

## ***Qoraalka Tababarashada Degan ee Sawiridda la Hagayo***

Adiga oo isticmaalaya [waraaqda shageynta ee “Tababasharada Degan”](#) raac tababarashada la hagayo ee hoos ku qoran:

1. Maskaxda ku soo celi sawirka dareenkaagii hore. Maskaxda ku sawir midabka, qaabka, iyo sida loo dareemayo oogada sawirkaas. Malee inad dareenka ka soo saartid meesha ad u maleysay in dareenku ku jiray.
2. Goobta banaan, qaabka ad ku magacawday nabad, deganaansho ama farxad ku beddeli qaabka dareenkaagii hore. Maskaxda gali midabka, nooca oogada, qaabka iyo urta dareenkan. Haddii ad qortid hees ama cod ad jeceshahay, kaas ka maqal xagga dambe ee maskaxdaada.
3. Samee neefsasho qoto dheer adiga oo maskaxda galinaya sawirka cusub ee ad abuuray, adiga oo dareenka nababka, deganaansho ama farxad u oggolanaaya inu buuxiyo dhammaan goobta banaan ee dareenkii aan fiicnayn u markii hore ku jiray.

La kulanka dareen aan fiicnayn waa wax aan laga baxsan karin, laakiin waxa ad awood u leedahay inad maskaxda galisid meel ammaan ah oo u ka buuxiyo dareen ah nabad, deganaansho ama farxad. Adiga oo adeegsanaya sawiridda la hagayo, waxa ad awood u leedahay inad khafiifisid dareenkaaga iyo jawaabtaada ku aadan dareenkaas ama caadifadahaas.